# Dib u daabac sida laga bilaabo 22 Maajo 2019

# Guddiga Weydiinta Royal ee Weerarka Masaajidyada Christchurch ee 15 Maarso 2019 Amarka 2019

(LI 2019/72)

**Fiiro gaar ah**

Isbadelada ay ansixiyeen subpart 2 ee Qeybta 2 ee Xeerka Sharciga 2012 waxaa lagu sameeyay dib u daabicidan rasmiga ah.

Qoraalka 4 ee dhammaadka dib u daabacidaan waxay bixisaa liiska wax ka beddelka lagu daray.

**Amarka waxaa maamulo Waaxda Arimaha Gudaha.**

Elizabeth Labaad, oo Nimcadii Boqorada Illaaha ee New Zealand iyo Boqortooyada iyo Dhulalka Kale, Madaxa Barwaaqo sooranka, Difaacaha Aaminaada:

Ku socoto—

Mudanaha Sharaf mudan William Gillow Gibbes Austen Young, KNZM:

Jacqueline Emma Caine, Agaasimaha—Mashaariicda Gaarka ah ee Te Rūnanga o Ngāi Tahu iyo Safiirka Hore ee New Zealand u fadhiyay Chile:

Salaamo!

Inagoo ah, Guddigeenan, waxaan aasaasnay Guddiga Weydiinta Royal ee Weerarka Masaajidyada Christchurch ee 15 ka Maarso 2019.

Amarkan ee Gollaha ka kooban Guddigeena wuxuu ka sameysanyahay—

(a) sida waafaqsan ogolaanshaha Waraaqaha Maamulka Sharafteeda Elizabeth Labaad oo ka kooban xafiiska Wakiilka Barwaaqa sooranka New Zealand, taariikhdu tahay 28 Oktoobar 1983;* iyo

(b) sida waafaqsan ansixinta qeybta 6 Xeerka Weydiinta 2013 iyo maadada qodobada Xeerkaas; iyo

(c) ee qalabka iyo ogolaanshaha Gollaha Fullinta.

*SR 1983/225

Hordhaca: wax laga badelay, 22 Maajo 2019, xiliga qeybta 4 ee Gollaha Weydiinta Royal ee Weerarka Masaajidka Christchurch ee 15 Maarso 2019 Amarka La badelay 2019 (LI 2019/105).

# Dalabka

## 1 Ciwaanka

Amarkan waaa Guddiga Weydiinta Royal ee Weerarka Masaajidyada Christchurch ee 15 Maarso 2019 Amarka 2019

## 2 Bilaabida

Amarkan wuxuu bilaabanayaa maalinta kadib taariikhda ogeysiinteeda ee *Gazette*.

## 3 Fasiraada

Ku jirto amarkaan,—

**weydiinta** waxaa laga wadaa in Guddiga Weydiinta Royal ee Weerarka Masaajidyada Christchurch ee 15 Maarso 2019 ee lagu aasaaasay amarka

**hay'adaha qeybta Gobolka quseyso** waxaa laga wadaa Adeega Sirdoonka Amniga New Zealand, Xafiiska Amniga Isgaarsiimada Dowlada, Booliska New Zealand, Adeega Canshuurta New Zealand, Socdaalka New Zealand, iyo wakaalad kaloo walba ee shaqooyinkeeda ama dhaqanka, ku jiro aragtida weydiinta, baahiyada la tixgelinayo si markaas loo buuxiyo xeerarka tixraaca weydiinta.

## 4 Guddiga Weydiinta Royal la aasaasay

Guddiga Weydiinta Royal ee Weerarka Masaajidyada Christchurch ee 15 Maarso 2019 ayaa la aasaasay

## 5 Arinta ahmiyada bulsheed leh ee ah mowduuca waydiinta

Arinta muhiimada bulsheed leh oo in weydiinta lagu aadiyo baaritaanka waa—

(a) wakaaladahee qeybta Gobolka quseyso ayaa wax ka og howlaha shaqsiga lagu dalacay dambiyada la xiriiro weerarka 15 Maarso 2019 ee Masaajidka Al-Noor iyo Xarunta Islaamka Linwood ee Christchurch, weerarkaas ka hor; iyo

(b) tallaabooyinkee (haddii ay kuwa jiraan) hay'adaha qeybta Gobolka waxay qaateen sida la xidhiidha cilmigaas; iyo

(c) haddii ay jireen wax qiyaaso dheeraad ah ee quseeyo wakaaladaha qeybta Gobolka ee qaadi karay inay ka hortagaan weerarka; iyo

(d) qiyaasahee dheeraadka ah ayay aheyd inay qaadaan wakaaladaha qeybta Gobolka si looga hortago weeraro noocaas ah mustaqbalka.

## 6 Xubnaha iyo guddoomiyaha weydiinta

(1) Dadka soo socda waxaa loogu xilsaaray inay yihiin xubnaha weydiinta:

(a) Mudanaha Sharafta mudan William Gillow Gibbes Austen Young, KNZM:

(b) Jacqueline Emma Caine.

(2) Qofka noqonayo guddoomiyaha weydiinta waa Mudanaha Sharafta mudan William Gillow Gibbes Austen Young, KNZM.

Firqada 6: waxaa badelay, xiliga 22 Maajo 2019, firqada 5 ee Gollaha Weydiinta Royal ee Weerarka Masaajidka Christchurch ee 15 Maarso 2019 Amarka La badelay 2019 (LI 2019/105).

## 7 Taariiqda markii weydiinta ay bilaaban karto iyada oo la tixgelinayo cadeynta

Weydiinta waxay ku bilaaban kartaa iyada oo la tixgelinayo cadeynta 13 Maajo 2019.

## 8 Xeerarka tixraaca

Xeerarka tixraaca oo weydiinta waxaa lagu dajiyay Jadwalka.

## 9 Waaxda la xiriirto

Wixii ujeedooyinka qeybta 4 ee Xeerka Weydiinta 2013, Waaxda Arimaha Gudaha waa **waaxda la xiriirto** oo weydiinta iyo masuuliyada arimaha maamulka ee la xiriiro weydiinta.

# Jadwalka
# Xeerarka tixraaca

cl 8

## 1 Sharaxaada

(1) Xiliga 15 Maarso 2019, shaqsi ayaa weeraray Masaajidka Al-Noor iyo Xarunta Islaamiga Linwood ee Christchurch iyada oo caabudayaasha ay salaada ku jireen. Konton-iyo kow qof ayaa lagu dilay iyo in ka badan 50 kalena ku dhaawacmay, qaarkood halis ah. Shaqsi ayaa lagu eedeeyay xadgudubyada la xiriiro weerarka oo sugayo maxkamad saarid.

(2) Dowlada waxay ku dhawaaqday in Guddiga Royal loo xilsaarayo inay weydiiyaan waxa wakaaladaha qeybta Gobolka ee wax ka og howlaha shaqsiga weerarka ka hor, maxaa, haddii wax walba, ay ku sameeyaan warbixintaas, tallaabooyinkee wakaaladaha ay qaadi lahaayeen si ay uga hortagaan weerarka, iyo tallaabooyinkee ayay wakaaladaha qaadi karaan si ay uga hortagaan weeraro noocaas ah mustaqbalka.

(3) Weydiinta waxay u baahantahay in lagu soo wargeliyo arimahan si degdeg ah si markaas Dowlada ay u leedahay madax banaani iyo wargelin ansaxsan oo arimahaan si loo kalsooni siiyo bulshada New Zealand, oo ay ku jiraan bulshooyinkeeda Muslimka ah, in dhammaan qiyaasaha ku haboon ay qaadeen hay'adaha qeybta Gobolka si loo hubiyo badbaadadooda iyo illaalada.

(4) Dowlada waxay filaneysaa weydiinta inay ku xirnaato bulshooyinka Muslimka New Zealand oo arimahan.

(5) Dowlada waxay heshay damaanad oo filanayaan in dhammaan wakaaladaha qeybta Gobolka quseyso, saraakiisha, iyo shaqaalaha waxay sameynayaan ugu dambeyntooda inay la shaqeeyaan weydiinta la siiyay muhiimada arimaha lagu dalacay baaritaanka iyo ka warbixinta.

Jadwalka firqada 1(1): waxaa badelay, 22 Maajo 2019, ee firqada 6(1) ee Gollaha Weydiinta Royal ee Weerarka Masaajidka Christchurch ee 15 Maarso 2019 Amarka La badelay 2019 (LI 2019/105).

## 2 Ujeedada weydiinta iyo arinta muhiimada bulshada

Arinta muhiimada bulshada oo in weydiinta lagu aadiyo baaritaanka waa—

(a) wakaaladahee qeybta Gobolka quseyso ayaa wax ka og howlaha shaqsiga lagu eedeeyay dambiyada la xidhiidha weerarka 15 Maarso 2019 ee Masaajidka Al-Noor iyo Xarunta Islaamka Linwood ee Christchurch, weerarkaas ka hor; iyo

(b) tallaabooyinkee (haddii ay kuwa jiraan) hay'adaha qeybta Gobolka waxay qaateen sida la xidhiidha nuxurka ogaanshahaas; iyo

(c) haddii ay jireen wax tallaabooyin dheeraad ah ee quseeyo wakaaladaha qeybta Gobolka ee qaadi karay inay ka hortagaan weerarka; iyo

(d) tallaabooyinkee dheeraadka ah ayay aheyd inay qaadaan wakaaladaha qeybta Gobolka si looga hortago weeraro noocaas ah mustaqbalka.

## 3 Baaxada Weydiinta

Si markaas loo gaaro ujeedooyinkeeda, weydiinta waa inay qeydiisaa gudaha—

(a) howlaha shaqsiga weerarka ka hor, oo ay ku jiraan—

  (i) warbixin quseyso ee waqtigiisa ee Ustareeliya; iyo

  (ii) imaanshahiisa iyo daganaanta New Zealand; iyo

  (iii) safarkiisa ee gudaha New Zealand, iyo caalami ahaan; iyo

  (iv) sida uu u helay shatiga qoriga, hubka, iyo rasaasta; iyo

  (v) isticmaalkiisa warbaahinta bulshada iyo warbaahinta kale ee onleenka; iyo

  (vi) xidhiidhadiisa dadka kale, haddii uu ku jiro New Zealand ama caalami ahaan; iyo

(b) wakaaladahee qeybta Gobolka quseyso ayaa wax ka ogaa shaqsigaan iyo howlahiisa weerarka ka hor, tallaabooyinkee (haddii ay kuwa jiraan) ayay qaadeen sida la xidhiidha ogaanshahaas iyo haddii ay jireen wax tallaabooyin dheeraad ah ee ah in wakaaladaha ay qaadi lahaayeen si ay uga hortagaan weerarka; iyo

(c) haddii ay jireen wax caqabado ah ee quseeyo wakaaladaha qeybta Gobolka oo usu keenayo ama wadaagayo warbixinta la xiriirto weerarka, ama ku dhaqmayo warbixin noocaas ah, oo ay ku jiraan caqabadaha sharciga; iyo

(d) haddii ay jireen wax diirad saarid aan ku habooneyn, ama mudnaan dajinta, illaha ka hortaga argagaxisada oo wakaaladaha qeybta Gobolka quseyso weerarka ka hor.

## 4 Arimaha xiliga oo natiijooyinka la raadiyay

Weydiinta waa inay wargelisaa natiijooyinka arimaha soo socda:

(a) haddii ay jireen warbixin walba ee la bixiyay ama haddii kale loo heli karo wakaaladaha qeybta Gobolka ee quseyso oo ogeysiin karta ama ogeysiin laheyd weerarka iyo, haddii warbixin noocaas ah la bixiyay ama haddii kale la heli karo, sida wakaaladaha uga jawaabeen warbixin noocaas ah oo la mid ah, iyo haddii jawaabtaas ay ku habooneyd; iyo

(b) isdhaxgelida ka midka ah wakaaladaha qeybta Gobolka quseyso, oo ay ku jiraan haddii ay jireen wax fashilaad ah warbixin wadaagida u dhaxeysa wakaaladaha quseeya; iyo

(c) haddii wakaaladaha qeybta Gobolka quseyso ku guuldareystaan inay filanayeen ama qorsheeyaan weerarka ay sababtayka fiirsasho aan ku habooneyn ee illaha ka hortaga argagaxisada ama ahmiyadaha halisaha kale ee argagaxisada; iyo

(d) haddii wakaalad walboo qeybta Gobolka ku guuldareystaan inay buuxiyaan heerarka loo baahanyahay ama ay haddii kale qalad ku jireen, haddii guud ahaan ama qeyb ahaan; iyo

(e) arimo kaloo kale ee quseeyo ujeedada weydiinta, ee illaa iyo xad muhiim u ah bixinta warbixinta dhameystiran.

## 5 Arimaha xiliga oo tallooyinka la raadiyay

(1) Weydiinta waa inay sameysaa tallooyin walba ee ay u tixgeliso inay ku haboontahay sida soo socota:

(a) haddii ay jiraan wax horumar ah xaga macluumaad ururinta, wadaagista, iyo dhaqamada falanqeynta oo wakaaladaha qeybta Gobolka oo ka hortagi lahaa weerarka, ama ka hortagi lahaa weeraro noocaas ah oo mustaqbalka, oo ay ku jiraan, laakiin kuma xadidna, qabashada wakhti habboon, ku filnaanshaha, waxtar lahaanta, isku xidhka shaacinta macluumaadka, wadaagida, ama barbardhiga u dhaxeeyo wakaaladaha qeybta Gobolka quseeya; iyo

(b) isbadeladee, haddii ay ku jiraan, ayaa ah in la fulliyo si sare loogu qaado wakaalada qeybta Gobolka quseysa, ama dhaqamada howlgalka, si loo hubiyo ka hortaga weeraro noocaas ah mustaqbalka; iyo

(c) arimo kaloo kale ee quseeyo kuwa kore, ee illaa iyo xadka lama huraanka u ahbixinta warbixin dhameystiran.

(2) Si looga fogaado shakiga, tallooyinka waxay la xiriiri karaan sharciga (laakiin ma ahan sharciga hubka), xeerka, sharciyada, heerarka, ama dhaqamada quseeya xeerarka tixraaca, oo joogteynayo iswaafaqsanaanta qiyamyada guud ahaan laga ogolyahay ee bulshada dimuqraadiga ah.

## 6 Xadadka baaxada awooda weydiinta

(1) Sida waafaqsan qeybta 11 ee Xeerka Weydiimaha 2013, weydiinta ma laha awooda lagu go’aansanayo masuuliyada rayidka, dambiga, ama masuuliyadaha anshaxeed ee qof kasta laakiin laga yaabo, inuu ku dhaqmo awoodahooda oo sameynayo waajibaadyadooda, ka dhigaa natiijooyinka qaladka ama tallooyinka tallaabo dheeraad ah laga qaadayo si loo go’aansado masuuliyada.

(2) Weydiinta waa inaysan weydiin dambiilaha iyo dambi la’aanta shaqsiga ee lagu, ama laga yaabo, in lagu eedeeyo xadgudubyada la xiriira weerarka.

(3) Weydiinta waa inaysan u baahan, go’aansan, ama ka warbixin mida meelgaarka ama wadada ugu dambeyso ee, mid walba ee ka mid ah arimaha soo socda:

(a) wax ka beddelka sharciga hubka (sababtoo ah Dowlada waxay si gooni ah u dabagaleysaa arintan):

(b) hawlaha oo shirkadaha ama ururada ka baxsan qeybta Gobolka, sida qaababka warbaahinta:

(c) sida wakaaladaha qeybta Gobolka quseysa uga jawaabeen weerarka 15 Maarso 2019, markii uu bilowday.

## 7 Weydiinta waxay tixgelin kartaa baaritaanada kale ama dib u eegidaha

Weydiinta waxay ku xisaabtami kartaa natiijada baaritaan walba ama dib u eego arimaha quseyso xeerarkooda tixraaca, laakiin kuma xirno qaab walba oo gabagabada ama tallooyinka baaritaano noocaas ah.

## 8 Weydiinta waxay kala tashan kartaa shirkadaha kale ama dadka

(1) Weydiinta waxay kala tashan kartaa shirkadaha ama dadka kale, oo ay ku jiraan Baaraha Guud ee Sirdoonka iyo Amniga, haddii ay u tixgeliyaan in wadahadal inuu caawinayo si ay u qabtaan waajibaadyadooda.

(2) Dowlada waxay filaneysaa in wedyiinta ay u xilsaareyso qof ama dad u qalmo oo ku haboon si ay u caawiyaan weydiinta la macaamulkooda bulshooyinka Muslimka New Zealand, iyo in weydiinta ay kala tashaneyso bulshooyinkaas marwalboo ay u baahantahay inay sidaas sameyso si markaas looga saaro masuuliyadaheeda.

## 9 Qabashada Weydiinta

Aruurinta weydiinteeda, weydiinta waxaa laga filanayaa inay tixgeliso cadeynta—

(a) saraakiisha wakaalada quseyso iyo shaqaalaha; iyo

(b) dadka kale ee quseeyo, oo ay ku jiraan xubnaha bulshooyinka Muslimka.

## 10 Mabaadi'da weydiinta

(1) Maadada baahida loogu soo wargelinayo si wax ku ool ah arimaha lagu dajiyay xeerarkaan tixraaca, weydiinta waxaa lagu jaheeyay inay ku dhaqanto awoodaheeda iyo waajibaadyada oo soo wargeli qaab noocaas ah sida loo yareeyo suurtogal nimada inay tahay nidaamyadeeda ama wargelinteeda, ama qeyb walba oo iyada ah, waxaa lagu isticmaalaa shaqsi walba ama koox (oo ay ku jiraan shaqsiga lagu eedeeyay xadgudubyada la xiriiro weerarka) si sare loogu qaado howlaha sharci darada ah, ama haddii kale waxyeeleynta danaha bulshada.

(2) Arimaha weydiinta lagu dalacay ee baaritaanka sida tooska ah ula xiriiro dhaqamda howlgalka quseeyo wakaaladaha qeybta gobolka, oo ay ku jiraan wakaaladaha sirdoonka iyo amniga, kaas oo ah ama ahaanayo qarsoodi danaha bulshada si markaas loo hubiyo badbaadada bulshada, si looga fogaado naceybka xiriirada caalamiga ah ee Dowlada New Zealand iyo ku aaminida warbixinta Dowlada New Zealand ee ku saleysan qarsoodi, iyo joogteynta sharciga.

(3) Sida waafaqsan, weydiinta waa in, marwalba ay u tixgelisaa inay muhiim u tahay dhowrida qarsoodi noocaas ah, hayaa weydiinta, ama qeyb walboo iyada ah, oo gaar ahaan. Weydiinta waa inay sidoo kale xididaa gelitaanka warbixinta weydiinta (oo ay ku jiraan cadeynta, gudbinada, go’aamada, qoraalada dhageysiga, iyo aqoonsiga marqaatiga ama dadka kale) halka ay u tixgeliso in tallaabooyin noocaas ah loo baahanyahay—

(a) si markaas loo—

(i) illaaliyo amniga iyo difaacida danaha New Zealand ama xiriirada caalamiga ah ee Dowlada New Zealand:

(ii) illaaliyo qarsoodiga warbixinta la siiyay New Zealand ee ku saleysan qarsoodiga oo wadan kale ama hay'ada caalamiga ah:

(iii) illaaliyo aqoonsiga marqaatiga ama dadka kale:

(iv) ka fogow naceybka joogteynta sharciga, oo ay ku jiraan ka hortaga, baaritaanka, iyo ogaanshaha xadgudubyada:

(v) hubiyaa in xaquuqaha maxkamad saarida cadaalada ah ee shaqsiga la illaaliyo:

(vi) hubiyaa dambiga hadeer iyo mustaqbalka, rayidka, edbinta, ama dacwado kale lama caci karo; ama

(b) wixii sabab kale oo weydiinta tixgelisaa ku haboonaanta.

(4) Warbixinta weydiinta waa inaysan shaacin warbixin xasaasi ah (sida lagu qeexay qeybta 202 ee Xeerka Sirdoonka iyo Amniga 2017).

Jadwalka firqada 10(4): waxaa wax laga badelay, 22 Maajo 2019, firqada 6(2) Gollaha Weydiinta Royal ee Weerarka Masaajidka Christchurch ee 15 Maarso 2019 Amarka La badelay 2019 (LI 2019/105).

## 11 Ka warbixinta

(1) Weydiinta waa inay soo bandhigtaa warbixinteeda, oo ay ku jiraan natiijooyinkeeda iyo tallooyinka, ee Gofanaha-Guud ahaan, qoraal ahaan ah, oo aan ka dambeyn 10 Diseembar 2019.

(2) Tixgelinta baahida si loo hubiyo in tallaabooyin walba si loo hubiyo badbaadada bulshada waxaa lagu qaadaa daahid la’aanteed, marka la doorto weydiinta waxaa lagu hagaajiyaa si looga fekero, oo ay la jirto dhammaan degdega suurtogalka, haddii la sameynayo tallooyin ku meelgaar ee Gofanaha-Guud ahaan, iyo, haddii ay sidaas tahay, markii tallooyinkaas ku meelgaarka ah la sameyn karo, iyo si loogu bandhigo tallooyinkaas Gofanaha-Guu ahaan oo xili walba ka hor bandhigida wargelintooda ugu dambeyso.

(3) Weydiinta waa in, ka hor bandhigida warbixinteeda ugu dambeyso, la go’aansado haddii ay jiraan arimo kale oo ka soo baxayo weydiinta—

(a) in ay raadiso wargelinta Xeerka Sirdoonka iyo Amniga ee loo yaqaan qeybta 192 ee Xeerka Sirdoonka iyo Amniga 2017; ama

(b) oo howlgal ahaan xasaasi ah, oo ay ku jiraan arin walba ee la xiriirto aruurinta sirdoonka ama qaababka soo saarida, ama illaha macluumaadka, ee ah in looga warbixiyo Wasaarada masuulka ka ah wakaaladaha sirdoonka iyo amniga, ama Dambi baaraha-Guud ee Sirdoonka iyo Amniga, ama labada; iyo

haddii ay sidaas tahay, waa inay raadisaa ka warbixinta ama ama uga warbixisaa si waafaqsan.

Marqaati ahaan halka Aan ku sababnay midaan Guddigeena in loo sameeyo iyo Siilka New Zealand oo halkan loogu lifaaqo ee Wellington maalinta 8aad ee Abriil 2019.

Marqaatiga Aaminaadeena iyo Si wanaagsan Loo jacelyahay Xaquuqda Mudanaha sharafta mudan Dame Patsy Reddy, Madaxa iyo Maamulaha Dame Grand Companion ee Amarkeena New Zealand ee Heerka sare, Maamulaha Saaxibka Amarka Adeegeena, Gofanaha-Guud ahaan iyo Talliyaha Madax ee dhinaca Boqortooyadeena New Zealand.

Patsy Reddy,
Gofanaha-Guud ahaan.

Oo Amarkeeda Heerka sare,

Jacinda Ardern,
Ra'isalwasaaraha.

Lagu ansixiyay Gollaha,

Michael Webster,
Karaaniga Gollaha Fullinta.

Waxaa lagu sameeyay sida waafaqsan ogolaanshaha Xeerka Sharciga 2012.

Taariiqda ogeysiinta ee *Gazette*: 8 Abriil 2019.

## Qoraalada dib u daabacida

### *1Guud ahaan*

Kani waa dib u daabicida Guddiga Weydiinta Royal ee Weerarka Masaajidyada Christchurch ee 15 Maarso 2019 Amarka 2019 oo isku dhafo dhammaan badelada amarkaas sida taariiqda badelka ugu dambeeyay ee iyada.

### *2Heerka sharciga*

Dib u daabicida waxaa si sax ah loogu isticmaalay gobolka, sida taariiqda dib u daabicida, sharciga waxaa lagu ansixiyay maamulaha ansixinta iyo badelo walba ee ansixintaas. Qeybta 18 ee Xeerka Sharciga 2012 wuxuu bixiyaa in dib u daabicidaan, lagu daabacay qaab koronto ah, leeyahay heerka nooca rasmiga ah sida waafaqsan qeybta 17 Xeerkaas. Nooca la daabacay ee dib u daabicida si toos ah loogu saaray noocaan korontada rasmiga ah sidoo kale waxay leedahay heer rasmi ah.

### *3Isbadelada tafaftirka iyo qaabka*

Isbadelada tafaftirka iyo qaabka ee dib u daabicida waxaa lagu sameeyay isticmaalida awoodaha sida waafaqsan qeybta 24 to 26 ee Xeerka Sharciga 2012. Fiiri sidoo kale http://www.pco.parliament.govt.nz/editorial-conventions/.

### *4Badelada lagu dhafay dib u daabicidaan*

Gollaha Weydiinta Royal ee Weerarka Masaajidka Christchurch ee 15 Maarso 2019 Amarka La badelay 2019 (LI 2019/105)